Xuquuqdaada iyo Waajibaadkaaga

Foomkani waxaa ku qoran waxa Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (DHS) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) isku raacaan in ay kuu qabtaan. Waxyaabahani waa "xuquuqahaaga." Waxaa sidoo kale ku qoran waxa aad oggolaato in aad qabato marka aad codsato ama hesho mid ka mid ah kuwo hoosta ku qoran:

- Taageerada lacageed
- Daryeelka carruurta
- Taageerada rabshada qoyska
- Taageerada caafimaad
- Gargaarada cuntada

Waxyaabahani waa "waajibaadkaaga."

Fadlan si taxaddar leh u akhri foomkaan. Waxaad weydiisan kartaa shaqaalaha DHS in ay foomkaan kuu sharraxaan. Weydii su'aalo haddii ay jirto wax aadan fahmaynin. Waxaad oggolaatay in aad sameyso waxyaabaha qaarkood marka adiga (iyo qoyskaagu) aad gargaaro ka heshaan DHS ama OHA. Waxaa suuragal ah in lumiso gargaaradani ama dibu bixiso gargaarka adiga oo siinaya DHS ama OHA, haddii aad hesho wax ka badan intii ay ahayd in aad hesho.

Xuquuqdaada *(waxa aad ka filan karto DHS iyo OHA):*

- DHS iyo OHA waxay kugula dhaqmayaan si qaddarin, caddaalad iyo hab edeb leh.
- Waxaad xaq u leedahay in aad wax ka waydiiso oo aad codsato barnaamij kasta oo ah DHS ama OHA. Waxaa suuragal ah in aanu tixraac ahaan kuugu dirno adeegyada kale ee aad u baahan tahay.
- Waxaad codsan kartaa in rasiid lagu siiyo markasta ee aad foom u keento xafiiska DHS ama OHA.
- Waxaad codsan kartaa in aad kulan la yeelato qof shaqaale ah. Sidoo kale waxaad codsan kartaa in aad la hadasho qof mas'uul ah.
- Waxaad codsan kartaa caawimaad si u codsato, buuxiso foomamka, ama wixii isbeddelo ah ugu soo sheegto luqadda aad doorbidayso.
- DHS ama OHA waxay ku siin doonaan macluumaad u qoran qaab ama luqad aad fahmi karto.
- DHS ama OHA waxay ku dadaalayaan in ay daboolaan baahiyahaaga gaarka ah haddii aad tahay qof naafo ah. DHS iyo OHA waxay raacaan Sharciga Dadka Naafada ah ee Maraykanka iyo Qaybtiisa 504 ee Xeerka Dhaqan-celinta.
- Waxaad codsan kartaa in aad aragto qoraalada adiga kugu saabsan ee ku jira faylka kiiskaaga.
- Haddii aad qabto "sabab fiican," waxaad codsan kartaa in aadan la shaqeyn barnaamijka masruufka carruurta. Sabab fiican macnaheedu waa in soo ururinta masruufka carruurtu in uu khatar gelin karo adiga iyo carruurtaada. DHS iyo OHA waxay ku siin doonaan foomamka lagu sharraxay sababta fiican. Foomamkaan waxay kuu sheegayaan sida Barnaamijka Masruufka Carruurta ee Oregon uu kaa caawini karo helitaanka masruufka carruurta, oo ay ku jiraan taageerada lacageed ee caafimaadka, adiga oo iyo carruurtaada ka dhigaya kuwo badbaado ku sugan. DHS iyo OHA waxay sidoo kale ka jawaabi karaan su'aalahaaga ku

saabsan sababta fiican.

- Waxyaabaha aad u sheegto DHS iyo OHA waxaana ka dhigi doonaa kuwo gaara ah oo sir ah. Waxaad 'ogaysiiska Dhacdooyinka Asturan' ee aan leenahay ka fiirin kartaa https://apps.state.or.us/Forms/Served/me2090.pdf or posted in DHS offices.
- Haddii aad tahay qof waayeel ah, waxaad xaq u leedahay in aad hesho jeegaga Barnaamijka Nafaqada Waayeelka ee Suuqa Beeraleyda (SFMNP), haddii loo qalmo. Si kastaba ha ahaatee, ma sameyn kartid haddii aad ka qayb qaadato Barnaamijka Nafaqada Waayeelka ee Suuqa Beeraleyda (SFMNP) oo gobol kale ah.
- DHS iyo OHA waxay kuu sheegi doonaan inaad u qalanto gargaarada ee tirada maalmaha hoosta ku qoran gudahood:
    - 30 maalmood oo loogu talagalay gargaarada cuntada iyo lacagta
    - 30 maalmood oo loogu talagalay deeqda lacageed ee Gargaarka ku Meel Gaarka ah ee Dadka ka Badbaaday Rabshadaha Qoyska (TA-DVS) – go'aan lagu gaaro 16 saacadaha shaqada gudahood marka aad dhammeystirto wareysiga aanu yeelanayno adiga oo si kale wax u weydiista maahane
    - 45 maalmood oo loogu talagalay faa'iidooyinka kale
    - 7 maalmood oo loogu talagalay in aad si dhakhso ah u hesho gargaarada cuntada, haddii aad u qalanto
    - 90 maalmood oo loogu tala galay go'aanka caafimaad ee la xiriira naafanimida (marka laga reebo xaaladdaha aan caadiga ahayn)
- Waxaad codsan kartaa dacwad dhageysi haddii aadan kula raacsaneyn go'aanka DHS ama OHA. Waa in aad isticmaashaa foomka Codsiga Dhageysiga Maxkamadeed (MSC 0443) marka codsiga dacwad dhageysigu uu ku saabsan yahay mid kasta oo ka mid ah kuwa hoosta ku qoran:
    - Lacagta
    - TA-DVS
    - Gargaarada daryeelka carruurta

  Qof shaqaale ah oo ka tirsan DHS ayaa kaa caawini karaya buuxinta dacwad dhageysiga. Gargaarada cuntada, waxaad dacwad dhagaysi ku codsan kartaa telefoon ahaan, qoraal ahaan ama shakhsi ahaan. Haddii aad hesho adeegyada daryeelka ee guriga iyo bulshada ku saleysan ama xarumaha daryeelka dadka waayeelka ma jirto xuquuq loo leeyahay dhageysi dacwadeed oo ku saabsan sheegashada dib u soo celinta hantida. Waxyaabo dheeraad ka ogow qaybta Barnaamijka Dib u soo celinta Hantida. Waa in aad dhageysi dacwada ku codsataa tirada maalmaha hoosta ku qoran gudahood, haddii aad hesho gargaaradani:
    - 45 maalmood oo loogu talagalay taageerada lacageed, taageerada rabshada qoyska, ama gargaarada daryeelka carruurta
    - 90 maalmood oo loogu talagalay gargaarada lacageed haddii lagaa joojiyay iyadoo ay la xiriirto qorshaha dacwadaada JOBS. Tani waxaa ka mid wax iska joojinta loogu talagalay in aan la aadin daaweynta loogu talagalay mid kasta oo ka mid ah kuwa hoosta ku qoran:
        - Caafimaadka dhimirka
        - Mukhaadaraadka
        - Aalkolada
    - 90 maalmood oo loogu talagalay taageerada caafimaad iyo gargaarada cuntada

Waajibaadkaaga *(waxyaabaha ay tahay in aad sameyso):*

Haddii aad ka tirsan tahay mid ka mid ah barnaamijyada DHS ama OHA, waa in aad:

- Siiso DHS iyo OHA macluumaad run ah, sax ah oo dhammeystiran.

- Keento wax caddeynaya waxyaabaha qaarkood ee aad soo sheegto. Haddii aadan heli karin caddeyn, waa in aad noo oggolaataa in aanu la xiriirno dadka ama hay'adaha kale si aan caddeyn u helno marka aan u baahano.
- Bixiso warbixinta kharashyada marka la helayo TA-DVS.
- In aad ka qayb qaadato barnaamijka shaqada iyo tababarka haddii aanu kaaga baahano in aad sidaasi sameyso. Waxaa sidoo kale u baahan karnaa in aad hesho, aqbasho oo aad sii haysato shaqo. Shuruudani ma khuseyso barnaamijyada caafimaadka.
- U oggolaato shaqaalaha DHS iyo OHA in ay gurigaaga kugu soo booqdaan si ay u helaan macluumaad ku saabsan kiiskaaga.
- DHS iyo OHA u soo sheegto wixii isbeddelo ah.
- DHS iyo OHA ka caawiso in ay soo helaan caddeyn haddii kiiskaaga loo xusho in dibu eegis lagu sameeyo. Kiisasku waa kuwo si nasiib ah loo doortay si looga qayb qaato dib u eegista.
- U fasaxdo in la bixiyo macluumaadka ku saabsan masruufka carruurtaada ee laga helo Waaxda, Qaybta Masruufka Carruurta, oo la siiyo DHS iyo OHA, marka laga reebo adiga oo haysta sabab fiican.

Haddii aad qaadato gargaarka cuntada, sidoo kale waa in aad:

- Samee kuwa hoose oo dhan, marka laga reebo adiga oo haysta sabab fiican:
  - Aadan shaqada ka tagin
  - Aadan saacada shaqadda hoos ugu dhigin wax ka yar 30 saacadood toddobaadkii
  - Aqbasho shaqo lagu siiyay
- Soo sheegto oo bixiso caddeynta kharashyada hoosta ku qoran, haddii aad rabto in iyagu ogaadaan gargaaradaada caafimaad:
  - Caafimaadka
  - Adeega 'Utility'
  - Masruufka ay maxkamaddu amartay
  - Daryeelka lagu tiirsan yahay

  Haddii aad soo sheegi waydo kharashyadani ama xaqiijin waydo marka la codsado, looma isticmaali doono in lagu ogaado gargaaradaada cuntada. Haddii aadan soo sheegin wax isbeddel ah islamarkaana aad qaadato gargaar farabadan, waxaa suuragal ah in aad dib u bixiso lacagta gargaarada adiga oo siinaya DHS ama OHA.
- Ka qayb qaadato qorshaha shaqo iyo tababar ee ay kuu fidiyaan DHS ama OHA ama hay'adaha aan wada shaqeynta leenahay.

Haddii aad hesho Taageerada Lacageed, Taageerada Ku meel gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF) ama taageerada lacageed ee qoxootiga, waa in aad sidoo kale:

- Sameyso baaritaanka caafimaadka ee loo baahan yahay si loo ogaado haddii aad u qalanto adeegyo gaar ah.
- Codsato oo isticmaasho wixii kale ee gargaaro ah ama lacagta aad u qalanto. Waa in aad sidaan u sameyso adiga iyo dadka kale ee aad doonayso in aad caawiso. Tani waxaa ka mid noqon kara kuwa hoosta ku qoran:
  - Caymiska Shaqo la'aanta
  - Gargaarka Daryeelka Bulshada
  - Caymiska dhaawaca aanu qofku qaladkiisa lahayn, kaasi oo ah dhammaan caymiska baabuurka
- Oggolaato adeegyada bulshada ee ay maxkamaddu amarto ama ku saabsan tababarka ama shaqada.
- Tagto barnaamijyada caafimaadka maskaxda iyo mukhaadaraadka ama khamriga, haddii ay DHS ama OHA go'aamiso in aad u baahan tahay in lagaa caawiyo. Sidani soo kaliya

sameyso haddii aad heli kartid barnaamij adiga bilaash kuu ah.

- 10 maalmood gudahood ugu soo sheegto Kooxda Mas'uulka ka ah Dhaawaca Qofka Soo gaara haddii **adiga ama qof ka tirsan qoyskaagu** sameeyaan kuwa hoose labadoodaba:
    - Aad hesho gargaarada TANF.
    - Aad haysato sheegasho ka dhan ah qof oo la xiriirta dhibaato dhaawac oo uu sababay.

TANF, waa in aad sidoo kale ka caawiso sidii lagu heli lahaa masruufka carruurta aan ka ahayn:

- Mid kasta oo ka mid ah kuwan hoose waa run:
    - Marka aad ku jirto barnaamijka JOBS Plus
    - Marka aad ku jirto Barnaamijka Qoyska ee Gobolka ee Caymiska Social Security-ga (SSI) iyo Caymiska Naafanimada Social Security-ga (SSDDI)
    - Marka aad ku jirto Post-TANF
    - Marka aad u qalanto barnaamijka lacageed ee qoysaska laba waalid ka kooban.
    - Marka aad helayso Lacagaha Shaqada
- Uu khatar gelin karo adiga iyo carruurtaada. Waxaad xaqiisaa in aad DHS ama OHA u sheegto.

Haddii aad hesho Barnaamijka Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta (ERDC), waa in aad:

- Copaygaaga ERDC siisaa daryeel bixiyahaaga carruurta bil kasta si aad u sii wadato u qalmida.
- Isla markiiba u sheegto DHS haddii aad lumiso shaqo ama ku jirto fasax caafimaad. Waxaa dhici karta in DHS ay bixiso lacagta daryeelka carruurta ee loogu talagalay waqtiga inta aad shaqo raadinayso ama inta lagu jiro fasaxaaga caafimaad.
- Waxaad xaq u leedahay in aad doorato daryeel bixiyahaaga carruurta. La xiriir DHS ama wac 211 wixii caawimaad ah si aad u hesho:
- Dooro daryeel bixiyaha carruurta oo awoodi doona in uu dhammaan kuwo hoosta ku qoran la sameeyo DHS:
    - Buuxiya shuruudaha daryeel bixiyaha carruurta
    - Buuxiya heerarka caafimaadka iyo badbaadada
    - Liiska ku jira oo la oggolaaday

Haddii aad heshi Taageero Caafimaad, waa in aad:

- Codsato ama isticmaasho gargaarada qaarkood ama lacagta ee aad u qalanto. Tani waxaa ka mid noqon kara mid kasta oo ka mid ah kuwa hoosta ku qoran:
    - Social Security-ga
    - Hawlgabnimada tareenka
    - Gunnada Hawlgabka Ciidanka
    - Faa'iidooyinka laga helo koox iyo ka mid ahaanshaha urur
    - Caymiska dhaawaca aanu qofku qaladkiisa lahayn, kaasi oo ah dhammaan caymiska baabuurka
    - Caymiska magdhawga shaqaalaha
    - Caymiska daryeelka mudada fog
    - Caymiska caafimaad
    - Medicare
- Marto baaritaankii kasta ee caafimaad ee aad u baahan tahay si aad u buuxiso arjigaaga

codsi ee taageerada caafimaad.

- Dhakhaatiirta u sheegto haddii aad qabto caymis caafimaad oo kale. Tusaalooyinka hoos ku qoran:
    - Medicare
    - Gunnada Hawlgabka Ciidanka
    - Caymiska magdhawga shaqaalaha
    - Caymiska dhaawaca aanu qofku qaladkiisa lahayn, kaasi oo ah dhammaan caymiska baabuurka
    - Caymis caafimaad oo kale

  Daryeel bixiyayaashu waa in ay kharashka u diraan caymiska kale ka hor inta aysan u soo dirin DHS ama OHA kharashka daryeelkaaga caafimaadka.
  Sii lambarkaaga Aqoonsiga caafimaad ee gobolku bixiyay ka hor intaadan helin adeegyada.

- Haddii loo baahdo, bixi lacagta bishii si aad u sii hesho gargaarada caafimaad iyo adeeg. Tiradan lacageed waxaa dhici karta in la isku dheeli tiro, taasi oo la xiriirta isbeddelka ku yimaada xaaladaada dhaqaale.
- 10 maalmood gudahood ugu soo sheegto Kooxda Mas'uulka ka ah Dhaawaca Qofka Soo gaara haddii **adiga ama qof ka tirsan qoyskaagu** sameeyaan kuwa hoose labadoodaba:
    - Aad heshaan taageero caafimaad ama faa'iidooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).
    - Aad haysato sheegasho ka dhan ah qof oo la xiriirta dhibaato dhaawac oo uu sababay.

Aqoonsiyada barnaamijka

Su'aal ku saabsan taageerada lacageed

Gargaarada lacageed waxaa sidoo kale loo yaqaanaa labada magac ee hoosta ku qoran:

- Taageerada Ku meel gaarka ah ee Qoysaska Baahan (Temporary Assistance for Needy Families -TANF)
- Taageerada Lacageed ee Qoxootiga

Taageerada lacageed waxaa loogu talo galay inay buuxiso baahida aasaasiga ah ee qoyska. Tusaalooyinka waxyaabaha sida kuwa hoosta ku qoran:

- Cuntada
- Dharka
- Hoyga
- Adeega korontada, gaaska, telefoonka iwm

Soo saarista kaarka Elektaroonikada ah ee Gargaarka Cuntada (EBT) waa habka dadka intooda badani u helaan gargaarada lacageed marka la joogo Oregon. Kaarkan sidoo kale waxaa loo yaqaan Kaarka Cayrta ee Oregon. Kaarka looma isticmaali karo mid kasta oo ka mid kuwa hoosta ku qoran:

- Tukaan khamriga gada. Tani waxaa ka mid ah ganacsiga kaliya gada ama inta badan gada khamriga beer-ka ama khamriga wine-ka.
- Goob khamaarka loogu tala galay (casino) ama ama xarun kale wax lagu cayaaro
- Ganacsi goobaha dadka waawayni ka helaan waxyaalaha galmada ku saabsan ee dadku qaawan yihiin ama qayb ahaan qaawan yihiin. Tani waxaa ka mid ah tukaanka dadka waaweyni ku fiirsadaan cajaladaha fiidiyaha galmada la xiriira ee inta badan gada ama tusa cajaladaha fiidiyaha ee galmada ama filimada.

- Xarunta Marijuana laga bixiyo

Xayiraadahani waxay khuseeyaan markasta oo aad Kaarkaaga Cayrta ee Oregon u isticmaasho in aad kula baxdo ama ku kharash garayso gargaarada lacageed. Xayiraadahani waxay khuseeyaan marka aad la baxdo ama la kharash garaynso gargaaro lacageed oo ku jira koontada (account) bangi gaar ah.

Haddii aad hesho Gargaarka ku Meel Gaarka ah ee Dadka ka Badbaaday Rabshadaha Qoyska (TADVS):

Gargaarka ku Meel Gaarka ah ee Dadka ka Badbaaday Rabshadaha Qoyska (TADVS) waa gargaaro lacageed si loo bixiyo:

- Kaalmo dhaqaale iyo taageero oo ku meel gaar ah oo la siiyo qoysaska ay saameeyeen rabshada qoyska.
    - Inta lagu jiro dhibaato ama xaalado degdeg ah.
    - Marka aan ilaha kale la heli karin.

Gargaarada TA-DVS waxaa lagu bixiyaa jeeg la siiyo shirkada ama laba qof oo lacag la siinayo.

DHS waxay ku weydiin doontaa su'aalo ku saabsan xaaladaada dhanka rabshada qoyska. Ka hor intaanan oggolaansho loo helin wax lacag bixin ah, DHS waxay kaaga baahan tahay in aad nala sameysato qorshe dhanka ammaanka ah. Caddeyn ayaa looga baahan yahay arrimaha lacag bixinta TA-DVS oo kasta. Lacagaha aan loo isticmaalin dhanka ammaanka inta aad ku jirto 90 maalmood ee muddadaada u qalmida waxay ku sii nagaan doontaa DHS. Haddii aad codsato taageerada rabshada qoyska wax ka badan hal mar 12 bilood gudahood, codsigaaga cusub wuxuu u baahan karaa dib u eegis.

Haddii aad hesho TANF:

U xilsaarida bixinta lacagta iyo haysashada hanti

Si aad ugu qalanto TANF, waa inaad u oggolaato DHS ama OHA inay qaataan wixii lacag ah ee:

- Adiga ama dadka kale ee kula qaata TANF ay helaan ama xaqa u leh in ay ka helaan kuwa sida sharciga ah uga mas'uulka ah dhaawac.

Tani waxaa ku jirta lacagta laga helo mid kasta oo ka mid kuwa hoosta ku qoran:

- Caymiska caafimaadka gaarka ah
- Caymiska gaariga
- Dadka
- Meelaha kale

Tani kor ku xusan waxaa loo yaqaanaa "u xilsaaridda bixinta lacagta" loo xilsaarayo in ay dadka ka qaadaan DHS ama OHA. Si aad u sii wadato in aad hesho TANF adiga iyo xubnaha kale ee qoyska (oo ay ku jiraan carruurta dhalan doonta mustaqbalku) waa in ay ka caawiyaan DHS ama OHA inay raadiyaan sidoo kale helaan lacag bixintani iyaga soo samaynaya dhammaan hababka soo socda:

- U sheegaan DHS, OHA iyo daryeelkaaga urruradu iska kaashadeen (CCO) in koox saddexaad dhaawacday adiga ama xubin ka tirsan qoyska iyaga oo lagu soo sheegayo muddo 10 maalmood gudahood ah.
- U bixiyaan macluumaad ku saabsan qaybaha sababay dhaawaca.
- Caawimaad uga geystaan macluumaadka kale ee la codsaday. Tani waxaa ka mid ah macluumaadka caymiska. Waxaa jira xadi ah cadadka lacageed ee DHS ama OHA ay qaadan

karaan. Ma ay noqon karto in ka badan lacagta la bixiyay laga soo bilaabo taariikhda dhaawaca ama marka ay lacag ku siiyeen kooxda ka mas'uulka ah dhaawaca. Haddii kuwa hoosta ku qoran labadooduba dhacaan, waxaa dhici karta in aad lacagta dib noo siiso:

- Taageerada caafimaad ee DHS ama OHA ay bixiyeen lacagta adeegyada caafimaad.
- Aad lacag ka hesho kuwa ka mas'uulka ah dhaawacaaga.

Fiiri Macluumaadka Ku Saabsan qaybta Taageerada Lacageed.

Waxaad u baahan tahay in aad ka ogaato "u xilsaaridda taageerada"
"Taageerada" waxaa loola jeedaa lacagta aad heshaan adiga iyo carruurtaada, sida qof la isqabi jiray ama masruufka carruurta. Marka aad hesho gargaarada lacageed, waxaad gobolka u "xilsaartay" in ay helaan taageerada aad adiga ama qof kasta oo qoyskaaga ka tirsan ka heshaan qof kale. Lacagta waxaa dib loogu bixinayaa lacagta caddaanka ah ee aad gobolka ka heshaan.
Ogow: Tani ma ay quseynayso muddada aad qaadato gargaarada lacageed oo ka socda mid ka mid kuwa hoosta ku qoran:

- JOBS Plus
- Barnaamijka Qoyska Gobolka ee Pre-SSI/SSDI (SFPSS)
- Barnaamijka Post-TANF
- Marka aad tihiin qoys laba waalid ka kooban
- Marka aad helayso Lacagaha Shaqada.

Lacagaha taageerada ah inta aad helayso gargaarada lacageed.
Wuxuu gobolku la harayaa qayb ka mid ah lacagta taageerada (ee lacagihii haatan iyo kuwii lagu lahaa ee hore labadoodaba) ee loogu talagalay adiga iyo xubnaha qoyskaaga. Gobolka lama hari doono lacagta taageerada masruufka carruurta oo idil. Wuxuu gobolka kuu soo diri doonaa $50 oo ah taageerada masruufka carruurta ee haatan ilmo kasta bishiiba ilaa $200 qoyskiiba bil walba. Gobolka lacagtaa uma xisaabin doono dakhli ku soo gala marka la eegayo inta aad gargaarka u qalanto.

Ogow: Haddii aad codsato taageerada lacageed oo ka tirsan tahay mid ka mid ah kuwa hoosta ku qoran, gobolka guud ahaan ma sii hayn doono lacagtaada masruufka carruurta:

- Barnaamijka SFPSS
- JOBS Plus
- Qoys laba waalid ka kooban

Marka aanu go'aan ka gaarno u qalmiddaada iyo gargaarada, $50 (ilmo kasta bishiiba ilaa $200 qoyskiiba bil walba) oo ah masruufka carruurta haatan la helo looma xisaabin doono dakhliga bishii ku soo gala.

Marka aad ka baxdo gargaarka lacagta:

- Lacagaha taageerada ee haatan adiga ayaa qaadanaya.
- Wuxuu gobolku la harayaa lacagihii hore ee bilaha aad qaadanaysay taageerada lacageed.
- Waxaa laga yaabaa in aad awoodo in aad sii haysato bilaha aadan qaadanayayn taageerada lacageed.

La shaqeynta qaybta Masruufka Carruurta
Inta aad helayso gargaarka lacagta, waa in aad wada-shaqeyn la yeelato Barnaamijka Masruufka Carruurta.
Muhiim ah: Ma aha in aad wadashaqeyn la yeelato qaybta Masruufka Carruurta haddii aad u maleynayso in soo ururinta masruufka carruurtu in uu khatar gelin karo adiga iyo carruurta.

La shaqeynta qaybta Masruufka Carruurta waxaa looga jeedaa in aad sameyso waxyaabaha hoosta ku qoran:

- In aad caawimaad ka geysato in la helo waalidka kale ee ilmahaaga.
- In si sharci ah loo magacaabo aabaha ilmaha (si loo ogaado aabanimada).
- In aad hesho amarka masruufka.

Macluumaadka ku saabsan Taageerada Caafimaad

Macluumaadkani u akhri si taxadar leh

Macluumaadka aad ku bixiso arjigani waxay noqon doonaan kuwo ay dib u eegaan isla markaana xaqiijiyaan mas'uuliyiinta federaalka, gobolka iyo degaanku. Marka aanu go'aamino u qalmidaada taageerada caafimaad, DHS iyo OHA ayaa isticmaala kuwa soo socda:

- Habka Xaqiijinta Dakhliga iyo U qalmida (IEVS)
- Habka Xaqiijinta Hantida (AVS)

AVS wuxuu ka raadiyaa kuwa hoose ee ku saabsan adiga iyo xubno ka tirsan qoyska oo loo baahan yahay si loo bixiyo macluumaadka dhaqaale marka aad codsato isla markaana hesho taageero caafimaad. AVS wuxuu raadiyaa kuwa hoose, in aad soo sheegto iyo in kale.

- Hay'adaha maaliyaddeed
  - Koontooyinka bangiga
  - Koontooyinka ururada deynta
- Diiwaannada hantida dhabta ah
  - Guryo
  - Dhulka
  - Diiwaanka gaariga
    - Gawaari

Qofka la isqabo ee sharciga ah waa in uu bixiyaa macluumaadka dhaqaale. DHS iyo OHA waxaa suurta gal ah in ay macluumaadka foomkaaga siiyaan saraakiisha sharciga dhaqangeliya, si looga caawiyo inay soo xiraan qof sharciga ka baxsanaya.

U xilsaarida bixinta lacagta iyo haysashada hanti

Si aad ugu qalanto taageero caafimaad, waa inaad u oggolaata DHS, OHA iyo CCO aad leedahay inay qaataan wixii lacag ah ee:

- Adiga ama dadka kale ee kula hela taageero caafimaad, hela ama xaqa u leh in ay ka helaan kuwa sida sharciga ah uga mas'uulka ah dhaawac ama kharash caafimaad oo ay bixiyeen taageerada caafimaad.

Tani waxaa ku jirta lacagta laga helo mid kasta oo ka mid kuwa hoosta ku qoran:

- Caymiska caafimaadka gaarka ah
- Caymiska gaariga
- Dadka
- Meelaha kale

Tani waxaa loo yaqaanaa "u xilsaaridda bixinta lacagta" loo xilsaarayo in ay dadka ka qaadaan DHS ama OHA iyo CCO. U xilsaaridda lacaguhu waa kuwo toos ah oo loogu talagalay qof kasta oo hela taageero caafimaad. Si aad u sii wadato in aad hesho taageero caafimaad, adiga iyo xubnaha kale ee qoyska (oo ay ku jiraan carruurta dhalan doonta mustaqbalku) waa in ay ka caawiyaan DHS ama OHA inay raadiyaan sidoo kale helaan lacag bixintani iyaga soo samaynaya dhammaan hababka soo socda:

- U sheegaan DHS, OHA iyo CCO aad leedahay in koox saddexaad dhaawacday adiga ama xubin ka tirsan qoyska iyaga oo lagu soo sheegayo muddo 10 maalmood gudahood ah.

- U bixiyaan macluumaad ku saabsan qaybaha sababay dhaawaca.
- Caawimaad uga geystaan macluumaadka kale ee la codsaday. Tani waxaa ka mid ah macluumaadka caymiska. Waxaa jira xadi ah cadadka lacageed ee DHS ama OHA ay qaadan karaan. Ma ay noqon karto in ka badan lacagta la bixiyay ee loogu talagalay kharashyada caafimaad ee kooxdu sida sharciga ah uga mas'uulka tahay in ay bixiso. Haddii aad heshay TANF waxaa laga yaabaa in aad taasi dib u bixiso sidoo kale. Fiiri Macluumaadka Ku Saabsan qaybta Taageerada Lacageed.

Waxaa suurta gal ah in aanu yeelano lahaanshaha wixii lacag ah ee ay bixisay kooxda sida sharciga ah wax uga mas'uul ah si loo damaanad qaado lacagta la siinayo DHS, OHA ama CCO.

Bixinta macluumaad

Waa in aad ku raacsan tahay in kuwa hoosta ku qoran ay diiwaannada caafimaadka siin karaan shirkadaha caymiska:

- Caafimaad bixiyayaasha
- Isbitaalada
- Shirkadaha loo shaqeeyo
- Hay'adaha dowladda

Tani waxay daboolaysaa diiwaannada ay leeyihiin adiga ama xubnaha kale ee qoyska ee ku saabsan taageerada caafimaad. Waxaa tani loo sameyn doonaa oo kaliya si DHS ama OHA lacagta dib ugu helaan.

Haddii aad qabto caymis caafimaad oo kale

Haddii adiga ama xubin ka tirsan qoyskaagu aad qabtaan caymis caafimaad kale, u sheeg daryeel bixiyaha (dhakhtarka, bukaan socod eegtada, farmashiyaha ama cusbitaalka) ka hor inta aadan daryeel helin. Haddii aad leedahay caymiska gaariga isla markaana ku dhaawacantay shil gaari u sheeg daryeel bixiyahaaga waxyaabo ku saabsan caymiska gaarigaaga. Waa inay biilka u diraan caymiska kale inta aanay biilka u dirin OHA. Haddii DHS ama OHA ay bixiyaan biilka caafimaadka ay ahayd in caymisku bixiyo, DHS ama OHA waxay qaadi doonaan tallaabo si ay lacagtooda dib ugu soo ceshadaan. Tusaale:

- Haddii DHS ama OHA ay bixiyaan biil uu ahaa caymis gaar ahi inuu bixiyo, DHS ama OHA waxay isku dayi doonaan in ay dib shirkada caymiska lacagta uga soo ceshadaan.
- Haddii DHS ama OHA bixiyaan biilka caafimaadka sidoo kale fidiyuhuna uu lacag ka helo shirkada caymiska, DHS ama OHA waxay isku dayi doonaan inay lacagtooda dib uga soo ceshadaan fidiyaha.
- Haddii DHS ama OHA ay bixiyaan biilka caafimaadka shirkada caymiskuna ay kuu soo dirto jeeg, DHS iyo OHA waxay isku dayi doonaan in lacagtaasi ay dib kaaga soo ceshadaan.

Barnaamijka Dib u soo celinta Hantida

Barnaamijka Dib u soo celinta Hantida waa barnaamij waxyaabo badan ka kooban oo khuseeya kuwa hoosta ku qoran:

- Taageerada Caafimaad
- Taageero Guud
- Barnaamijka Dakhliga Dheeraadka ah ee Oregon
- Dadka qaarkood ee isku waqti hela Medicare iyo taageerada Caafimaad

Ujeedada laga leeyahay dib u soo celinta hantidu waa in la raadiyo dib u bixinta lacagta iyada oo

laga soo qaadayo hantida qofkii helayay uu geeriyooday. Lacagta qaarkeed waxay dib ugu noqotaa dowladda federaalka. Inta soo hartay waxaa lagu maalgeliyaa barnaamijyada loogu talagalay dadka kale ee baahan. Waxaa jira iska reebid badan oo ku aadan dib u soo celinta hantida.

Gobolku xaqa uu u leeyahay dib uga helida gargaarada ee gobolkaaga

Waxaa suurta gal ah in DHS iyo OHA ay lacag ka codsadaan gobolkaaga (sida uu qeexayo ORS 416.350) markaad dhimato ka dib haddii ay kugu habboon yihiin tahay xaaladaha hoosta ku qoran:

- Haddii kuwa hoosta ku qorani dhacaan, lacagta taageerada caafimaad waxaa dhici karta in laga bixiyo oo ay ka timaado hantidaada:
    - Aad faa'iidooyinka caafimaad heshay ka dib Oktoobar 1, 2013.
    - Aad ka weynayd 54 jir isla markaana heshay faa'iidooyinka daryeelka muddada fog.

  Tani waxaa ku jirta lacagaha Qorshaha Caafimaadka Oregon (Oregon Health Plan) ay magacaaga ku siiyeen qorshaha maamulka daryeelka (managed care plan) ama lacagaha ay siiyeen CCO.
- Haddii kuwa hoosta ku qorani dhacaan, lacagta taageerada caafimaad waxaa dhici karta in laga bixiyo oo ay ka timaado hantidaada:
    - Aad faa'iidooyinka caafimaad heshay ka dib Oktoobar 1, 2013.
    - Aad ka weynayd 54 jir, ama aad haysato ammaanada 'trusts' qaarkood:
        - Ammaanada baahiyaha gaarka ah
        - Ammaanada dakhliga cayiman
- Haddii aad heshay faa'iidooyin adiga oo adeegsanaya mid ka mid kuwa hoosta ku qoran, waxaa laga yaabaa in ay jirto sheegasho la xiriirta hantidaada:
    - Barnaamijka Dakhliga Dheeraadka ah ee Oregon
    - Taageero Guud Qaarkood
    - Gobolka waxaa looga baahnaa inuu bixiyo lacagta qaaraanka ee loogu talagalagay adiga sababta oo ah waxaad heshay taageerada caafimaad iyo Medicare Part D labadoodaba.

DHS iyo OHA waxay dib u dhigi doonaan wixii sheegasho lacageed ah haddii qofka aad isqabtaan uu nool yahay.

DHS iyo OHA ma sheegtaan lacag ay ka helaan hantidaada haddii mid ka mid ah xubnaha qoyskaagu ay wali nool yihiin:

- Ilmihii aad si caadi ah u dhashay ama aad korsatay ee da'diisu ka yar tahay 21 jir. Ogow: Tani kuma jiraan
  carruurta qoys hore la isku dhalay.
- Ilmihii aad si caadi ah u dhashay ama aad korsatay, da' kasta leh, kaasi oo aan indho qabin ama naafo ah sida uu qeexayo xeerka Social Security-gu.

Ogow: Sharciyada iyo xeerarka ku saabsan sheegashooyinka ka dhanka ah gobolka waxaa suurta gal ah in ay isbeddelaan ogaysiin la'aan.

Qof kasta oo hanti ka hela hanti uu leeyahay macmiilku waxay OHA ama DHS ka codsan karaan in ay ka dhaafto dib u soo celinta hantida haddii ay buuxiyaan shuruudaha looga baahan ee loo yaqaan iska dhaafidda dhibaato jirta awgeed (hardship waiver). Tilmaamaha ku saabsan sida loo codsado iska dhaafidda dhibaato jirta awgeed (hardship waiver) waxay ku

jiraan macluumaadka ay soo dirto Kooxda Dib u soo celinta Hantida marka ay bilowdo nidaamka dib u soo celinta.

Macluumaadka lagala xiriirayo Kooxda Dib u soo celinta Hantida wuxuu ku qoran yahay hoosta:

DHS Estate Administration Unit PO
Box 14021
Salem, OR 97309-5024
503-378-2884
1-800-826-5675 (Oregon oo kaliya)
Fax-ka: 503-378-3137

Xaddidaada waqtiga:

Xadka Muddada Gargaarka Lacagta (TANF)
Oregon waxay leedahay wakhti xaddidan oo ka kooban shan sano si loo helo adeegyada TANF. Waxaad fadlan shaqaalahaaga kala hadashaa sida ay arrintaan kuu saameynayso.

Wakhtiga xaddidan ee Taageerada Lacageed ee Qoxootiga
Waqtiga ugu badan ee la isku oggol yahay Taageerada Lacageed ee Qoxootiga waa siddeed bilood laga bilaabo waqtiga mid ka mid ah kuwan hoosta ku qoran:

- Aad soo geshay wadanka.
- Aad heshay deganaanshahaaga.

Waxaad fadlan shaqaalahaaga kala hadashaa sida ay arrintaan kuu saameynayso.

Wakhtiga la cayimay ee Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP)

Wakhtiga la cayimay in la helo faa'iidooyinka SNAP waa saddex bilood oo buuxda wakhti ka kooban saddex sano oo loogu talagalay kuwa hoose:

- Qof weyn oo caafimaad qaba oo aanay dad ku tiirsanayn

Haddii kale waxaa jira shuruudo looga baahan yahay shaqada. Waxaad fadlan shaqaalahaaga kala hadashaa sida ay arrintaan kuu saameynayso.

Soo sheegida isbeddelada

Haddii aad faa'iidooyin ka hesho DHS ama OHA, waa in aad soo sheegto isbeddelada qaarkood ee saamaynaya adiga iyo kuwo kale ee faa'iidooyinka hela. Haddii aad isbeddelka ku soo sheegin sida lagaaga baahan yahay waxaa suuragal ah in aad hesho faa'iidooyin fara badan. Qof kasta oo gurigaaga ku nool oo jira 18 sano ama ka weyn waxaa suuragal ah in laga codsado in ay dib u bixiyaan faa'iidooyinka uu helo.

Marka la oggolaado faa'iidooyinka, ogeysiintaadu waxay kuu sheegi doontaa waxa ay tahay in aad soo sheegto iyo goorta. Barnaamij kasta wuxuu leeyahay shuruudo dhanka soo sheegida la xiriirta. Waxa ay tahay in aad soo sheegto iyo goortu way kala duwanaan kartaa.
Marka aad soo sheegto isbeddel, shaqaalaha ayaa kula soo socodsiin doonaa haddii aad u baahan tahay in aad bixiso caddeyn. Haddii isbadelku saameynayo faa'iidooyinka kale ee aad hesho,

hay'addu ayaa kula soo socodsiin doonta. Haddii aadan hubin in ay tahay in aad soo sheegto isbeddel, waxaad weydiin kartaa shaqaale.

Ganaaxyo

Macluumaadka ku saabsan ganaaxa barnaamijka Taageerada Lacageed

Haddii aad ula-kac u sameyso waxyaabaha hoosta ku qoran si aad u hesho Gargaarka Ku Meel Gaarka ah (TANF) ee Qoysaska Baahan ama Taageerada Lacageed ee Qoxootiga waxaa jirta ciqaab:

- Aad bixiso warbixin been ah oo ku saabsan adiga ama qof kale oo aad u codsanayso.
- Aad bixiso warbixin ku saabsan adiga ama qof kale oo aad u codsanayso.
- Aad warbixin been ah ka bixiso meesha aad ku nooshahay.

Tani waa waxa dhici doonaa haddii aad samayso mid ka mid ah kuwa kor ku qoran:

- Marka ugu horreysa ma aad heli doontid gargaarka TANF muddo 12 bilood ah.
- Marka labaad ma aad heli doontid gargaarka TANF muddo 24 bilood ah.
- Marka seddexaad ma aad heli doontid TANF oo idil.
- Waxay noqonaysaa in aad dib u wada bixiso dhammaan gargaarka TANF ee ahayd in aadan helin.
- Gargaarkaaga cuntada ma uu kordhaayo xittaa haddii aad hesho TANF.

Barnaamijka TA-DVS Program haddii aad ula-kac u sameyso waxyaabaha hoos ku qoran, waxaad mudan kartaa ciqaab.

- Aad bixiso warbixin been ah oo ku saabsan daryeelka iyo haysashada carruurtaada.
- Aad macluumaad been ah ka bixiso deganaanshahaaga Oregon.

Warbixinta ku saabsan ganaaxa Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP)

Haddii aad sameyso kuwa hoosta ku qoran:	**Waxaad weynaysaa gargaarka cuntada muddadan dheer:**
• Aad macluumaad qariso ama aad been sheegto. • Aad isticmaasho kaararka Elektarooniga ee Wareejinta Gargaarada (EBT) ee qof kale iska leeyahay. • Aad u Isticmaasho gargaarka cuntada si aad ugu iibsato khamri ama sigaar/tubaako. • Aad ka ganacsato ama iibiso gargaarka ama kaararka EBT-ga. • La tuuro qasaca wax lagu cabo si lacag loogu helo. • Cuntada lagu gatay kaararka gargaarka cuntada oo dib loo gado iyadoo lacag lagu badalanayo.	• 12 bilood dembiga hore • 24 bilood dembiga labaad • Daa'in dembiga seddexaad
• Gargaarka cuntada oo lagu beddesho maandooriyeyaasha sida daroogada.	• 24 bilood dembiga hore • Daa'in dembiga labaad
• Gargaarka cuntada oo lagu beddesho hub, rasaas ama waxyaabaha la qarxiyo.	• Daa'in
• Ganacsi, iibsashada ama iibinta gargaarka cuntada qiimihiisu ka badan yahay $500.	• Daa'in
• Bixinta macluumaad been ah oo ku saabsan cidda aad tahay ama meesha aad ku nooshahay si aad u hesho gargaarka cuntada oo dheeraad ah.	• 10 sano dembi kasta

Waxaa laga yaabaa in ay sidoo kale kula soo gudboonaadaan kuwa hoosta ku qoran:

- Aad hesho ganaax gaaraya $250,000
- Lagu xiro ilaa 20 sano
- Aad hesho dacwad lagugu soo oogo sida dhigayaan sharciyada federaalku

Haddi aad ula-kac u sameyso kuwa hoosta ku qoran:	**Waxaad mudan kartaa kuwa hoosta ku qoran:**
• Aad isticmaasho kaarka EBT-ga ee aadan adigu lahayn. • Aad kaarkaaga EBT-ga ku wareejiso dad kale. • Aad hesho ama haysato kaararka EBT-ga ee aadan adigu lahayn.	• Lagugu helay dembi weyn ama dhaqan xumi. • Aad hesho ganaax. • Xabbis lagu geliyo. • Aadan u qalmin gargaarka cuntada in muddo ah.

Ciqaabta wareejinta hantiyeed

Waxaa laga yaabaa in aadan u qalmin faa'iidooyinka qaarkood haddii aad wareejiyo hanti taasi oo ka yar qiimaheeda ay leedahay. Marka aad bixiso hanti ama aad hanti gado waxaan dhahnaa waxaad wareejisay hanti. Hantidu waa dakhli iyo waxyaalaha qiimaha leh. Tusaalooyinku waa kuwa hoosta ku qoran:

- Guryo
- Hanti
- Gawaari
- Lacag

Shaqaalahaaga la hadal ka hor inta aadan gadin ama aadan bixin wax hanti ah.

Haddii aad wareejiso hanti waxaa laga yaabaa in aadan u qalmin faa'iidooyinka hoosta ku qoran:

- Adeegyada daryeelka muddada fog (LTC):
    - Guryaha daryeelka dadka waayeelka ah
    - Xarumaha dadka naafada ah
    - Adeegyada guriga-dhexdiisa laga bixiyo
    - Xarumaha dadka lagu xanaaneeyo
    - Goobo kale oo daryeel
- Lacagta Qoxootiga
- Taageerada Caafimaad ee Qoxootiga
- Gargaarada cuntada ee Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP)
- Gargaarada lacageed ee Barnaamijka Gargaarka ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska u Baahan (TANF)

Waxaan dib u fiirinaa ka hor inta aadan codsan si aan u ogaano haddii wax la xiriira wareejinta hantidu ay keenenayso ganaax.

- Marka ay noqoto LTC waxaan dib u fiirinaa 5 sano.
- Marka ay noqoto TANF waxaan dib u fiirinaa 3 sano.
- Marka ay noqoto Taageerada Lacageed ee Qoxootiga iyo Taageerada Caafimaad ee Qoxootiga waxaan dib u fiirinaa 3 sano.
- Marka ay noqoto SNAP waxaan dib u fiirinaa 3 bilood.

Ganaaxa loogu talagalay wareejinta hantidu wuxuu bilaabmaa marka aad codso ee aad u qalmayso. Ganaax ayaa lagu dabaqi doonaa kaliya faa'iidooyinka kor ku qoran. Ganaaxu wuxuu noqon doonaa in aanu diidi doono codsigaaga loogu talagalay faa'iidadaasi. Haddii aad wareejiso hanti inta aad helayso faa'iidooyin waxaa sidoo kale jiri doona ganaax. Ganaaxu wuxuu noqon doonaa in uu faa'iidooyinkaasi jooji in muddo ah. Joojinta faa'iidadaa LTC waxay hoos u dhigi karaa ama joojin kartaa faa'iidooyinkaaga caafimaad ee kale.

Macluumaadka ku saabsan barnaamijyada oo idil

Siyaasadayada aan kala takoorka ku dhisnayn

Waaxda Adeegyada Dadweynaha (DHS) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) qofna takoori maayaan. Tani waxaa loola jeedaa DHS iyo OHA inay caawin doonaan dhamaan inta u qalanta. DHS iyo OHA qofna si kale ula dhaqmi doonin iyagoo sabab uga dhigaya mid ka mid ah kuwa hoose:

- Da'da
- Asalka

- Midabka
- Dal laga soo jeedo
- Jinsiga
- Diinta
- Siyaasada la aaminsan yahay*
- Naafanimada
- Dookha galmo†
- Xaalada guur‡

Waxaad gudbin kartaa cabasho haddii aad aaminsan tahay in DHS ama OHA si aan caadi ahayn ay kuula dhaqmeen iyadoo ay la xiriirto sobobahani. Si aad cabasho u gudbiso, waxaad wacdaa ama qoraal u dirtaa Xafiiska Qareenka Gudoomiyaha Gobolka (Governor's Advocacy Office):

Governor's Advocacy Office 500 Summer Street NE, E17 Salem, OR 97301
503-945-6904
1-800-442-5238
TTY 711
Email-ka: DHS.info@dhsoha.state.or.us

Waxaa sharci ah in fursadaha loo wada siman yahay!

Waxaanu wada shaqeyn la leenahay Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA) iyo Waaxda Caafimaadka & Adeegyada Dadweynaha ee Maraykanka (HHS). Ladooduba waa shaqaaleeye iyo fursad bixiye ay dadku u siman yihiin. Adeegyo iyo gargaar dheeraad ah ayay loo helayaan dadka naafada ahi haddii ay codsadaan.

Si aad cabasho ugu soo gudbiso USDA iyo HHS, waxaad fadlan akhrisaa foomka "Macluumaadka Cabashada Kala takoorka ee Macmiilka" (DHS 9001). Waxaad foomkaan ka helaysaa "Xirmada Tixraaca iyo Macluumaadka" (DHS 6609).

*Macaamiisha SNAP way ka dhawran yihiin wixii kala sooc aaminsanaan siyaasadeed ah.
†Dookha galmo waxaa dhawray gobolka, laakiin maaha sharciyada federaalka.
‡Macaamiisha caafimaadka way ka dhawran yihiin wixii kala sooc xaalada guur ah.

Waa maxay sababta aan u doonayno Lambarka Daryeelka Bulshada

Kuwa hoosta ku qoran waxaa looga baahan yahay qofkasta oo codsanaya gargaarada lacageed ama cunto inay DHS iyo OHA siiyaan lambarkooda Social Security-ga (SSN):

- Sharciyada federaalka (42 USC 1320b-7(a) iyo (b), 7 USC 2011-2036, 42 CFR 435.910, 42 CFR
  435.920 iyo 42 CFR 457.340(b))
- Xeerka Maamulka Oregon (OAR 461-120-0210)

Haddii aad keento SSN, waxay dedejin kartaa hawsha arjiga codsi. Haddii qof aanu lahayn SSN, booqo www.ssa.govwixii macluumaad ah ee la xiriira sida loo codsado mid.

- DHS iyo OHA waxay isticmaali doonaan SSN-kaaga si ay uga caawiso go'aanka ah inaad u qalanto gargaarada. Waxaanu SSN-kaaga u isticmaali doonaa sameynta kuwa hoosta ku qoran:

    - Xaqiijinta dakhligaaga
    - Xaqiijinta hantida kale
    - Isbarbar dhigista diiwaannada kale ee gobolka iyo federaalka sida kuwa hoosta ku qoran:
        - Adeegyada Dakhliga Hoose (IRS)
        - Medicaid
        - Masruufka carruurta
        - Xafiiska Social Security-ga
        - Faa'iidooyinka caymis ee shaqo la'aanta la helo
        - Barnaamijyada kale ee taageerada dadweynaha.
- Waxaa suurta gal ah in DHS/OHA ay u isticmaalaan SSN-kaaga si ay u diyaariyaan ururinta macluumaad ama warbixin ay codsadeen ilaha dhaqaalaha fidiyay marka aad codsato ama aad gargaarada hesho.
- Waxaa suurta gal ah in DHS iyo OHA ay isticmaalaan ama sHAAca ka qaadaan SSN-kaaga:
    - Haddii aanu uga baahano in aanu socodsiino hawsha barnaamijka aad dalbaneyso ama aad gargaarka ka hesho.
    - Si loo sameeyo qiimeynta tayada iyo horumarinta hawlaha.
    - Si loo xaqiijiyo tirada saxda ah ee lacagta iyo in dib loo soo celiyo gargaarka dheeraadka ah ee la bixiyay.
    - Si loo xaqiijiyo in aanu qofna yeelan faa'iidooyin ka badan hal qoys.

Uma aanu baahnin Lambarka Social Security-ga ee loogu talagalay Taageerada Caafimaad ee Qoxootiga iyo Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta (ERDC).

Waxaa dhici karta in aan awoodno in aan dadka ka dhaafno shuruudaha lambarka Social Security-ga ee loogu talagalay TA-DVS. Ma aha in aad heshid ama bixiso mid haddii ay adiga iyo qoyskaagaba khatar gelin karaan halis la xiriirta rabshada guriga.

Saxiixayga (oo uu ku jiro saxiixa dhanka afka ama elektaroonig ah), waxaan ku raacsanahay kuwa hoosta ku qoran:

- Siiyo DHS iyo OHA macluumaad run ah, sax ah oo dhammeystiran.
- Waxaan u saxiixay arjigan sida ku cad ciqaabta. Tani oo macnaheedu yahay, in aan intii karaankayga ah bixiyay jawaabo sax ah oo la xiriira dhammaan su'aalaha ku qoran foomkan. Waan ogahay in aan haddii aan bixiyo macluumaad been ah ama run ahayn mudan karo kuwa hoosta ku qoran:
    - Ganaaxyo
    - Mas'uul ka noqon karo dib u bixinta lacagaha siyaadada ah
- DHS iyo OHA dib ayay u eegi karaan kiiskayga. Tani waxaa ku jiri karta in ay DHS gurigayga timaado.
- Waan ku wargalin doonaa macluumaadka is badala ee aan siiyo DHS iyo OHA marka ay iyagu iiga baahdaan.
- Waxaan macluumaad sax ah ka bixiyey jinsiyaddeyda iyo tan dadka kale ee aan gargaarada u codsado ama u qaado.
- Waan ogsoonahay in DHS iyo OHA ay fiirin doonaan xaalada muhaajirnimo ee dadka codsada ama hela gargaarada.
- Waan ogsoonahay in macluumaadka ay DHS iyo OHA ka helaan Adeega Waaxda Socdaalka iyo Muwaadinimada Maraykanka (United States Citizenship and Immigration Service - USCIS) uu saamayn ku yeelan karo qofka hela gargaarada. DHS iyo OHA ula xiriiri mayso USCIS qofkii aanan raadinaynin gargaarada.
- Waxaan ogolaanayaa inaan sii daayo diiwaanka taageerada carruurtayda ee la siinayo DHS

iyo OHA ee ka socda Waaxda Cadaalada (DOJ), Qaybta Taageerada Carruurta (DCS).

- Dadka waaweyn ee ay da'doodu u dhaxayso 16 iyo tahay 60 sano ee foomkaan ku yaal oo codsanaya gargaarka cuntada (SNAP) waxay isku diiwaan gelin doonaan barnaamijka shaqada ee gobolka. Haddii aan mustaqbalka ku daro da'ahan barnaamijka, sidoo kale way is diiwaan gelin doonaan.
- Haddii aan DHS ama OHA siin waayo nambarka Socail Security-ga qof raba gargaarada, qofkaasi waxaa laga yaabaa inuu awoodi waayo inuu helo.
- DHS iyo OHA aysan isticmaali doonin kharashyada loogu talagay kuwo hoose si loo ogaado faa'iidooyinkayga haddii aan anigu soo wargelin:
    - Hoyga
    - Caafimaadka
    - Daryeelka carruurta
    - Masruufka carruurta ee ay maxkamaddu amartay
- DHS iyo OHA waxaa suurta gal ah inay isticmaasho kambuutarka si ay u fiiriso dhamaan macluumaadka foomkani. Tani waxaa ka mid ah isku aadinta diiwaanada hoosta ku qoran:
    - Bangiga
    - Dakhliga
    - Faa'iidooyinka caymis ee shaqo la'aanta la helo
- Waan fahamsanahay in DHS and OHA ay suurta gal tahay inay isticmaalaan ama shaaca ka qaadaan SSN-kayga iyo SSN-ka qofkasta oo aan u codsado. Qaybta dhammaan barnaamijyada waxaa ku qoran sababta.
- DHS iyo OHA waxaa suurta gal ah in Waaxda Adeegyada Dadweynaha iyo Maamulka Caafimaadka Oregon ay macluumaadka ku qoran arjigan siiyaan:
    - Hay'adaha federaalka iyo gobolka ee dib u eegista sameynaya.
    - Saraakiisha sharciga dhaqangeliya, si looga caawiyo inay soo xiraan qof sharciga ka baxsada.
    - Wakaaladaha dawlada dhexe iyo gobolka iyo wakaaladaha lacag soo celinta gaarka ah, haddii ay tahay inaan dib u bixiyo gargaarada DHS ama OHA.
- Waxaa suuragal ah in DHS iyo OHA macluumaadkan u isticmaalaan maamulida barnaamijyada kale ee taageerada dadweynaha ee aan ka helo DHS ama OHA.
- Waxaan fahamsanahay in DHS ama OHA ay suuragal tahay inay hubiyaan halka aan u isticmaalo ama kula baxo gargaarada lacageed anigoo adeegsanaya Kaarkayga Cayrta ee Oregon. Waxaan fahamsanahay in aanan Kaarkayga Cayrta ee Oregon u isticmaali karin inaan ku kharash gareeyo gargaarada lacageed ama kula baxo gargaarada lacageed ee ku saabsan:
    - Tukaan khamriga gada. Tani waxaa ka mid ah ganacsiga kaliya gada ama inta badan gada khamriga beer-ka ama khamriga wine-ka.
    - Goob khamaarka loogu tala galay (casino) ama ama xarun kale wax lagu cayaaro.
    - Ganacsi goobaha dadka waawayni ka helaan waxyaalaha galmada halkaasi ee dadku qaawan yihiin ama qayb ahaan qaawan yihiin. Tani waxaa ka mid ah tukaanka dadka waaweyni ku fiirsadaan cajaladaha fiidiyaha galmada la xiriira ee inta badan gada ama tusa cajaladaha fiidiyaha ee galmada ama filimada.
    - Xarunta Marijuana laga bixiyo.

Waan fahamsanahay qofka sexeexay arjigani waa inuu dib u siiyo gargaarada DHS ama OHA marka dacwadayda jirto lacag siyaado ah oo la bixiyay. Kuwa ay tahay in ay ila codsadaan iyo wakiilka la oggolyahayna waxaa suuragal ah in uu sidoo kale mas'uul ka yahay wixii lacago siyaado ah ee la bixiyay.

Haddii aan magacaabo wakiil la ogolyahay ama qofka badalka ah oo lacagta la siinayo, waxaan fahamsanahay kuwa hoosta ku qoran:

- Haddii ay bixiyaan macluumaad khalad ah ama aan dhamaystirnayn si gurigaygu uu u helo gargaaro fara badan, ka dib markaa ay tahay inaan dib u bixiyo qaybtaasi fara badan.
- Qofka badalka ah ee lacagta la siinayo ee aan leeyahay uu si buuxda u leeyahay inuu isticmaalo gargaaradayda. Ma heli karo gargaarada oo badal ah haddii qofkani uu isticmaalo aniga oo aan oggolaansho bixinin.
- Uma isticmaali karo wakiil la ogolyahay ama qofka badalka ah oo lacagta la siinayo barnaamijka TA-DVS, waxaan fahamsanahay kuwa hoosta ku qoran.

Hadddii aan codsado gargaarada lacageed — Waxaan gobolka siinaya, xuquuqda ah in ay la haraan lacagaha taageerada. Tani waxaa lagu sharraxay macluumaadka Barnaamijka, qaybta taageerada lacageed. Waxaan fahamsanahay inayna ahayn inaan la shaqeeyo barnaamijka taageerada carruurta haddii ay tani khatar gelinayso aniga iyo ilmahayga.

Haddii aan codsado gargaarada lacageed iyo cuntada —Waxaan fahmay in aan gargaarka cuntada ka qaadan karin Barnaamijka Qaybinta Cuntada Qabiilka ee Dhul ay Maamulaan Hindida Maraykanka (FDPIR) iyo SNAP isku hal mar.

Haddii aan codsado Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta — Waxaan fahamsanahay in wixii gargaaro ah ee daryeelka carruurta la xiriira ee aan

Helo aan u gudbin doono Waaxda Dhakhliga Oregon. Tani waxaa laga yaabaa in ay saamayn ku yeelato deynta cashuurta ee la igu leeyahay ama lacagta laga yaabo in ay ii soo noqoto.

Haddii aan codsado Taageerada Caafimaad – Waxaan fahamsanahay in qaar ka mid ah adeegyada caafimaadka iyo qalabku ay u baahan yihiin oggolaansho hore (PA). In aan u baahan doono PA ka socda DHS ama OHA ama qorshahayga daryeelka la agaasimay ka hor inta aan la ii keenin.

Aniga iyo qofka aan isqabnaa waxaan isku raacnay in wixii lacag go’an ‘annuity’ ee aan helno in aan soo sheegno, DHS ama OHA waxay noqon doonaan ka-faa'iideyste.